UW Medicine
VALLEY
MEDICAL CENTER

# WAAXDA ADEEGYADA DHAQAALAHA BUKAANKA

## SIYAASADA KHARASH DALICIDA & URUURINTA VMC

| | |
|---|---|
| **Waaxda:** | **Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka - Adeega Macmiilka** |
| **Cinwaanka Siyaasada:** | **Kaalmada Dhaqaale** |
| **Lambarka Siyaasada:** | **PFS.5000.1** |
| **Ujeedada:** | **Nidaamku waxa uu qeexayaa nidaam si wanaagsan loo qeexay, oo ah heerka shaqada oo lagu doonayo lacagta bukaanku ka masuul yahay ee baaqiga ah. Nidaamku waxa uu qeexayaa nidaam joogto ah iyo tijaabo hantidhawr oo hawlaha la xidhiidha ah uruurinta xisaabaadka bukaanka iyo u gudbinta xisaabaadka hay'ad uruurinta daynta qaabilsan oo dibadeed.** |

**Xarunta Caafimaadka Valley waxay samayn doontaa dadaal macquul ah si ay u uruuriso baaqiga (ama cida ka masuulka ahi) ah masuuliyada dhaqaale ee shakhsi ahaaneed ee bukaanka. Xisaabaadka aan la bixin wixii ka dambeeya marka uu sameeyo isbitaalka dhamaan dadaalada uu ku uruurinayo waxaa loo gudbin doonaa hay'ado uruurin oo xirfadlayaal ah oo dibadeed si markaa ay u soo ururiyaan lacagta daryeelka la qaatay.**

**Nidaamka:**

***<u>Jadwalka Bayaanka Lacag Iska Bixinta ee Guud</u>***

| | |
|---|---|
| Bayaanka kowaad | Maalinta 1 |
| Bayaanka labaad | Maalinta 31 |
| Bayaanka sadexaad | Maalinta 61 |
| Wargelinta ugu danbaysa | Maalinta 91 |
| Wareejinta daynta laga quusto | Maalinta 120 |

***<u>Mabaadii'da Shaqo ee Guud:</u>***

1. Xarunta Caafimaadka Valley waxay qiraysaa in culays wayn oo dhaqaale ay ku tahay bukaanada aan lahayn caymiska daryeelka caafimaadka ama caymiskooda daryeelka caafimaadku uu xadidan yahay. Waxa aanu siinaynaa bukaanka aan lahayn caymiska qiimo dhimis lamid ah qiimo dhimista aanu siino shirkada caymiska ee aanu heshiiska kula jirno.

2. Bukaanada aan lahayn caymiska waxaa la siin doonaa ikhtiyaaro qiimo dhimis ah marka ay dhakhso u bixiyaan baaqiga lagu leeyahay. (Fadlan ka eeg siyaasada Dadka Bilaa Caymiska ah & Qiimo Dhimista Lacagta Hore Loo Bixiyo).

3. Bukaanada ama cida kale ee ka masuulka ah ee sheegata dhibaato ka dhalatay inay iska bixin kari waayaan baaqiga oo dhan mar kaliya waxaa la siin doonaa heshiis mudo kordhin ah oo 12 bilood ah, oo bilaa ribo ah. Lacagta ugu yar ee ay sugayaan dhamaan isbitaaladu waa $50 oo waa $25 waxay sugayaan dhamaan dhakhaatiirtu, waana inayna ka badan 12 bilood mudadeedu. Hadii bukaanka ama cida ka masuulka ahi ay ku bixin kari waydo 12 bilood lacagta dhan, dayn bangi ayaa la siin karaa heshiiska lacag bixinta la kordhiyay mudadeeda.

4. Xarunta Caafimaadka Valley waxay bixisaa ikhtiyaaro lacag bixin oo mudo dheer ah iyada oo kala kaashanayso bangiga.

5. Hadii bukaanku ay sheegtaan mushkilad lacag bixinta ah maadaama oo uu xadidan yahay dakhligiisu, bukaanka ama cida ka masuulka ah waxaa la siin doonaa arjiga Kaalmada Dhaqaale, taas oo ay tahay in la buuxiyo oo lala soo celiyo isaga oo wata waraaqaha dhaqaale ee xoojinta ee ku haboon si loo eego in lagu dabaro baaqiga xisaabta Kaalmada Lacagta. (Fadlan ka eeg Siyaasada Kaalmada Dhaqaale).

6. Xarunta Caafimaadka Valley waxay siisaa mulkiilayaasha guryaha habaynta Qaybta Cashuurta Valley ee Degmo Isbitaalka Dadwaynaha lambar 1 ee Degmada King ee cashuurta ay bixiyaan. Daynta Qaybta Valley waxa loo adeegsan karaa kharash jeebka laga bixiyo oo dayn ka maqan ah Xarunta Caafimaadka Valley kadib marka dhamaan cidaha kale iyo lacagta caymiska laga wada qaado wixii kaga aadanaa.

   - Xadiga habaynta waxaa lagu go'aamin doonaa iyada oo laga duulayo cashuurta laga bixiyo Degmo Isbitaalka Lambar 1 iyadoo la eegayo Duwaanada Cashuurta Degmada King ee rasmiga ah. Xadiga ugu badan ee inta qofku nool yahay ee Habaynta Qaybta Cashuurta Valley ee Degmo Isbitaal lambar 1 kasta dadka degan waa $3,000.

7. Bukaanka ama cida ka masuulka ah ee ku bixinaya jeeg / kiridhit / dhibit kaadh ee lacag ku filan ayna ku jirin xisaabta waxaa laga qaadi doonaa kharashka NSF oo dheeraad ah xisaabtooda. Xarunta Caafimaadka Valley wakhtigan waxay qaadaa kharash ah $35.00 Jeega Lasoo Celiyo wixii xisaabaadka jeegaga ama / kiridhit / dhibit kaadh ee loosoo celiyo maadaama oo lacag ku filan ayna ku jirin.

8. Valley Medical Center waxay kaa qaadi doontaa ribo ah 1%, 30 maalmood kadib marka ay soo saarto warbixinta kowaad iyo bilkasta oo ka danbaysa xisaabta leh xaalada kharash iska bixinta. Xisaabta leh qorshaha bixinta ama hakad ku jira ama sugaysa qiimaynta lagama qaadayo ribo ilaa inta dib loogu soo celinayo wareega iska bixinta.

9. Hadii Xarunta Caafimaadka Valley ay hesho boosta soo celinta ee bukaanka inta lagu jiro nidaamka kharash dalicida, xisaabaadka waxaa lagu samayn doonaa daraasad iyada oo laga faa'idaynayo khayraadka macquulka ah ee lagu ogaanayo hadii cinwaan sax ah la heli karo. Hadii uu cusub yahay, macluumaadka saxda ah ayaa la ogaan doonaa, xisaabta ayaa la gelin doonaa, oo wareega uruurinta lacagta ayaa sii socon doonta. Hadii cinwaan wakhtigan ah aan la helin, xisaabaadka waxaa loo naqdin doonaa ka shaqaynta munaasabka ah oo ku salaysan xaalada xisaabta ama waxaa loo gudbin doonaa hay'ada uruurisa daynta si dadaal dheeraad ah loo sameeyo.

10. Dadaalka uruurinta iska bixinta daynta Xarunta Caafimaadka Valley waxaa loo maamulaa si waafaqsan nidaamka Gobolka WA iyo shuruucda Medicare / Medicaid.

11. <u>Damaanadaha caafimaadka:</u>

    Marka bukaanku uu yahay dhibbane shil ama ficil kale oo gaf ah, shirkadiisa caymisku guud ahaan ma bixiso kharashka adeegyada caafimaadka marka la go'aamiyo in cid kale ay leedahay khasaaraha. Sidoo kale, bukaanka waxaa dhici karta in aanu lahayn caymis laakiin waxa uu ka dalban karaa inay bixiso kharashka ku baxay cida ka masuulka ah dhaawiciisu. Xaaladahan, UW/Xarunta Caafimaadka Valley waxay dalban kartaa rahan lacagta la bixinayo. Rahanku waxaa weeye shay ama hantida shakhsi ahaaneed oo lagu sugayo helitaanka lacagta daynta.

12. <u>Xisaabta La Geliyay Uruurinta Xisaabta Waxaa Kamid Noqon Kara:</u>

- Warbixin ka qeyb qaadan kara kreditka 180 maalmood kadib marka laga helayo qiimaha fudud. Qorshahan waxaa bilaabma maalmaha 120 ka dib markii qalin-jiirka lacagta la yiraahdo Laamaha Bixinta Qorshaha..
- Dacwada maxkamadeed ee baaqigii aan la bixin lama xarayn karo kahor 240 maalmood kadib kharashka ka bixitaanka isbitaalka ee koowaad marka la soo dalacay.
- Kasoo hadalka taleefanka
- Habaynta sharciga ah ee mushahar ka jarida daynta wixii intaa ka danbeeya
- Damaanadaha caafimaadka
- Xarunta Caafimaadka Valley waxa waajib ah inay ogolaato wixii talaabo sharci ah ee laga qaadato xisaab.
- Xarunta Caafimaadka Valley ma ogolaanayso dacwad hadii aanay jirin shaqaalayn wax ku ool ahi.
- Xisaabaadka waxaa lagu wareejin doonaa hay'ad mudo hal sano ah, oo waxaa haddana mar labaad lagu wareejin doonaa hay'ad kale iyada oo heshiis lacag bixin ah la gaadho ama xukun sharci ah la helo moojee.
- Wareejinta labaad ayaa la soo celin doonaa hal sano oo kale kadib hadii aanay helin wax dhaqdhaqaaq ah 90 maalmood ee horreeyey.
- Xisaabaadka lasoo celiyo marka cida labaad lagu wareejiyo waxaa loo arkaa kuwo aan la heleynin lacagtooda oo waxaa lagu qoraa Lacagta Aanay Hay'adu Heleynin.
- Baaqiga aan la bixin waxa uu ku jiri doonaa taariikhda daynta damiinka mudo todoba sano ah, ama toban sano hadii xukun sharci ah la helo.

***<u>Bukaanada aan haysan Caymiska Daryeelka Caafimaadka</u>***

1. Bukaanada Xarunta Caafimaadka Valley ee aan haysan caymiska daryeelka caafimaad waxaa loo diri doonaa bayaan soo koobaya kharashaadka daryeelka ay heleen ilaa 5 maalmood kadib marka ay ka baxaan isbitaalka. Macluumaadka ka hadlaya ikhtiyaarada dhaqaale waxaa lagu bixiyaa bayaanka iyadoo uu la socdo macluumaadka xidhiidhka ee waaxda Adeega Macmiilka.

    **Ogow**: Xarunta Caafimaadka Valley waxay siisaa kaalmada arjiga Medicaid bukaanada aan lahayn caymiska caafimaadka ee la dhigay isbitaalka. Bukaanada waxaa la eegi doonaa inay u qalmaan Medicaid oo waxay heli doonaan kaalmada nidaamka arjiga hadii ay munaasab tahay.

2. Bukaanadu waxay u qalmaan inay helaan 30% qiimo dhimis ah oo kharashka ah taas ah *<u>qiimo dhimista bilaa caymiska</u>*.

3. Waddanka waxay siiso xogta iyo xaqiijinta qofka ama qofka masuulka ah ee lacagta kala duwan ee ku baxay, waxayna u diraan 4 xiriirka muujinta. Kuwaasi oo ku saabsan xisaabta lacagta, qofka macmiilka ah waxay helayaan iskaashi hal-abuurka lacagta dheeraadka la soo baxay bilaash ah iyo/ama lacagaha. Berigii ugu horeysay ee qoraalka, macmiilka waxay helayaan wac iyo warqado SMS ah, ama xiriirka MyChart, ku bilowday 14 maalmood ka dib markii la sameeyo xogta ugu horeysa.

4. Hadii lacagta aan la wada bixin ama heshiis bixinta lacagta ah aan la gaadhin, wargelinta ugu danbaysa ee uruurinta kahor ayaa loo diri doonaa cida ka masuulka ah oo loogu sheegayo hadii ayna wada bixin baaqiga iyada oo dhan ama aanu jirin heshiis bixinta lacagta mudo 10 maalmood ah gudahood oo ka bilaabanta taariikhda bayaanka, markaa wax kale oo la samayn karaa ma jirto oo waxaa loo diri doonaa dadaalka uruurinta ee dheeraad ah xisaabta.

5. Hadii lacagta aan la wada helin, heshiis kale la gaadhin, xisaabta ay kasoo wareegto mudadii 120 maalmood ahayd, oo dhamaan shuruudaha u qalanka la buuxiyo, xisaabta waxaa lagu qori doonaa hay'ad uruurinta daynta oo xirfadle ah.

**<u>Bukaanadaa haysta Caymiska Daryeelka Caafimaadka</u>**

1. Xarunta Caafimaadka Valley waxay ku dalici doontaa kharashka caymisyada la sheegey. Xarunta Caafimaadka Valley waxay ka sugi doontaa lacagta bixiyaha kowaad, iyo lacag bixiyaha labaad marka heshiis caymis uu ka dhaxeeyo Xarunta Caafimaadka Valley iyo bixiyaha kahor inta aan bukaanka laga dalban inuu bixiyo baaqiga ku taagan xisaabta.

2. Xarunta Caafimaadka ee Valley waxay soo saari doontaa warbixinta ee xisaabaha macmiilka ka dib markii ay ka jawaabto kaararka maalgashiga ee (yaasha) maalgashiga. Markii laga helo dhammaan maalgashiga(yasha) ee la tegi kara, Valley waxay bixisaa xogta soo diyaariyey oo ku saabsan macmiilka sii kama dambaysa ee u baahan oo la soo dirayay oo ah afarta xaaladda xogta. Ku dhaqan xisaabta, maraykanadu waxay heli karaan is-xiriirka kaasoo loo marayo macmiilka ee aanu la shaqayno si ay ugu sameeyaan qorsheyo bixinta caawimaad oo laa faaiidaystaya iyo/ama lacag. Ku qotoma dhammaan dabeecadaha maalgelinta, maraykanadu waxay heli karaan wac, erayo soo dir, ama xogaha MyChart markii laga billaabo 14 maalmood ka dib markii uu bilawgo maalintii ugu horreysay ee warbixinta.

3. Hadii lacagta aan la wada bixin ama heshiis bixinta lacagta ah aan la gaadhin, wargelin kama danbays ah ee uruurinta kahor ayaa loo diri doonaa bukaanka ama cida ka masuulka ah oo loogu sheegayo hadii ayna wada bixin baaqiga iyada oo dhan ama aanu jirin heshiis bixinta lacagta mudo 10 maalmood ah gudahood oo ka bilaabanta taariikhda bayaanka, markaa wax kale oo la samayn karaa ma jirto oo waxaa loo diri doonaa dadaalka uruurinta ee dheeraad ah xisaabta.

4. Hadii lacagta aan la wada helin ama heshiis kale la gaadhin, xisaabta ay kasoo wareegto mudadii 120 maalmood ahayd, oo dhamaan shuruudaha u qalanka kale la dhamaystiro, xisaabta waxaa lagu qori doonaa hay'ad uruurinta daynta ah oo xirfadle ah oo isbitaalku kula jiro heshiis.